# MARIJUANA HADA WAA SHARCI OREGON DHEXDEEDA.

Si kastaba ha ahaatee, istimaalka maandooriyaha marijuana marka aad uurka leedahay ama aad naas-nuujinayso waxaa suuragal ah in ay dhibaato u geysato ilmahaaga.

## MAANDOORIYAHA MARIJUANA KA DHIG MID KA MAMNUUC AH CARRUURTA.

Waxaad xaqiijisaa in aanu qofna isticmaalin maandooriyaha marijuana marka la daryeelayo ilmahaaga.

## WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH EE KU SAABSAN MAANDOORIYAHA MARIJUANA IYO ILMAHAAGA:

- Booqo sharciyada Oregon: http://whatslegaloregon.com/.
- Wac 211 si aad ugu xiranto adeegyada caafimaadka iyo bulshada.
- Si aad u ogaatid sidii aad carruurtaada ugala hadli lahayd maandooriyaha marijuana, booqo bogga Caafimaadka iyo Badbaadada ee http://healthoregon.org/marijuana.

™

**Calaamadda aduunku isla yaqaan ee maandooriyaha marijuana macnaheedu waa in ay alaabtu ka kooban tahay maandooriyaha marijuana oo ay tahay in ay ku jirto baakadeedii asalka ahayd, sidoo kalena la dhigo meel aanay carruurtu gaari karin.**

Qoraalkani waa la bixin karaa isagoo qaab kale ah marka ay codsadaan dadka naafada ah ama dadka leh luqad aan ahayn Af-Ingiriisiga ee leh xirfad luqada Af- Ingiriisiga ah oo cayiman. Si aad u codsato daabacaadan oo qaab ama luqad kale ah, la xiriir Xafiiska OHA ee Maamulaha Caafimaadka Bulshada Gobolka 971-673-1222 (telefoonka iyo TTY-TDD), 971-673-1299 (fax-ka) ama health.webmaster@state.or.us.

SM OHA 8966 (01/2016)

# CARRUURTA IYO MAANDOORIYAHA MARIJUANA MAAHA KUWO ISLEH.

Waxaad carruurtaada ka dhigi kartaa kuwo badbaado iyo caafimaad leh adigoo markaasi aan isticmaalayn maandooriyaha marijuana marka aad uurka leedahay ama aad naas-nuujinayso.

Haddii ilmahaagu cuno ama cabo waxyaalo ka kooban maandooriyaha marijuana, waxaad sida ugu dhakhsaha badan u wacdaa Khadka bilaashka ah ee Xarunta Sunta (Poison Center Hotline):

**1-800-222-1222.**

Oregon Health Authority

# WAXAAD MAANDOORIYAHA MARIJUANA DHIGTAA MEEL AANAY GAARI KARIN

Maandooriyaha marijuana wuxuu carruurta ka dhigi karaa kuwo aad u jirin. Kimida THC waa maado ku jirta maandooriyaha marijuana oo dadka ka dhigta in ay "sakhraamaan." Marka ay noqoto dadka waaweyn, waxaa suuragal ah in kimikada THC ay beddesho dareenkooda sidoo kalena hoos u dhigto isla shaqaynta jirka iyo wakhtiga go'aan qaadashada. Kimikada THC waxaa suuragal ah in ay dadka qaar ku keento in ay yeeshaan walaac ama walwal, arkaan waxaan jirin iyo shaki badan/buufis aad u daran. Isticmaalka maandooriyaha marijuana waxaa kale oo suuragal ah in uu xiriir la leeyahay xasuus la'aanta muddada gaaban socota ee qofka la soo derista iyo awoodda loo leeyahay in wax la barto.

## Raac digniinahan:

- Waxyaalaha ka kooban maandooriyaha marijuana ku kaydi meel xiran oo aanay carruurtu arki karin ama gaari karin.
- Haddii ilmahaagu si kadis ah u liqo maandooriyaha marijuana (isagoo cunaya maandooriyaha marijuana oo laga sameeyay macmacaanka cookie, brownie, nacnac):
  - » Waxaad sida ugu dhakhsaha badan u wacdaa khadka bilaashka ah ee la dagaalanka sunta si aad taageero degdeg ah u hesho. Waxaad wacdaa 1-800-222-1222.
  - » Haddii astaamuhu u muuqdaan kuwo daran, waxaad wacdaa 911 ama waxaad isla markiiba aadaa qolka gargaarka degdega ah.
- Haddii la sakhraansan yahay ama la cabsan yahay marka la daryeelayo ilme maaha mid badbaado leh. Ha u ogolaan in qof sakhraansani uu daryeelo ilmahaaga.
- Maaha badbaado in aad la seexato ilmahaaga marka aad sakhraansan tahay. Maandooriyaha marijuana qaarkood waxay dadka ka dhigaan in ay hurdoodaan. Tani waxay kaa dhigi kartaa in uu yaraado taxadarka aad u yeelanayso baahiyaha ilmahaaga, ama waxay horseedi kartaa dhaawacyo ay sababaan marka aad isku dul rogrogto ama si aan ukas ahayn aad ilmahaaga sariirto uga tuurto.
- Ha kaxeyn gaari marka aad sakhraansan tahay ama ilmahaaga ha u ogolaan in uu raaco gaari haddii darawalku sakhraansan yahay.
- Qiiqa sigaarka ee kaa soo gaara qof cabbaya ama nuugaya tubaako ama maandooriyaha marijuana maaha mid badbaado leh. Qofna ha u ogolaanin in ay wax ku cabaan ama ku nuugaan gurigaaga dhexdiisa ama meel u dhow carruurtaada.

## MAANDOORIYAHA MARIJUANA ISKA ILAALI DHALASHADA ILMAHAAGA KA HOR IYO KA DIB

- Istimaalka maandooriyaha marijuana ee wakhti kasta oo ka mid ah ama nooc kasta leh inta uurka leeyahay ama marka la naas-nuujinayo waxaa suuragal ah in ay dhibaato u geysato ilmahaaga.
- Kimikada THC ee ku jirta maandooriyaha marijuana waxay u gudbi kartaa ilmahaaga marka aad uurka leedahay, ama aad naas-nuujinayso. Inkasta oo ay naas-nuujintu leedahay faa'iidooyin badan oo caafimaad, istimaalka maandooriyaha marijuana inta uurka la leeyahay waxaa suuragal ah in ay dhibaato u geysato ilmahaaga sababtoo ah kimikada THC waxay jirkaaga ku jirtaa wakhti dheer.

## TAAGEERADA IYO FURSADAHA JIRA

- La hadal dhakhtarkaaga haddii aad ka fakarayso in aad uur yeelato, uur leedahay ama aad naas-nuujinayso oo aad u baahan tahay taageero ah sidii aad u joojin lahayd maandooriyaha marijuana.
- Haddii aad maandooriyaha marijuana u isticmaalayso daawo ahaan, dhakhtarkaaga waydii waxyaalaha kuu bannaan oo aan dhibaato halis ah u geysanayn ilmahaaga.